

## Wasiiro kasocda Puntland ee ku sugan Maraykanka oo booqday Inver Hills Community College



**Minneapolis:-** Wasiirada ka socda  
Dowlada Puntland ee safarka ku jooga  
dalka Maraykanka ayaa booqday mid kamid  
ah jaamacadaha



Maraykanka ee ku  
xiran Jaamacadaha  
ka dhisan Gobalada  
Puntland.

Wasiirka Maaliya ee  
Dowlada Puntland  
Md.Mohammed Ali

Yusuf,  
iyo  
Wasiir  
Kuxigeen



nka Dekkada iyo Kaluumeysiga  
Md.Abduweli Abdirahaman Geyre, ayaa  
booqasho ku tahay Jaamacada Inver Hills  
Community College.



Wasiirada ayaa halkaa kula  
kulmay Madaxa Jaamacada  
Cheryl Frank. Wasiirada iyo  
maamulka Jaamacadaasi oo  
socod kumaray qeybaha kala gedisan ee  
Jaamacada Inver Hills campus ka kooban  
tahay, ayadoo uu Wasiirka Maaliyada  
Maxamed Yusuf uu ku tilmaamay  
Jaamacadaasi mid lamid ah tuu horey usoo  
dhigtay.

Jaamacada Inver Hills Community College  
ee ku taal gobalka Minnisota ayaa bilowday  
Sanadkan 2006 in ay la maataanowdo  
Jaamacada Nugaal University ee ku taal  
Puntland.

Bilo kahor ayey deegaanka Puntland safar  
ku tageen macalimiinta Jaamacada Inver  
Hills oo ay kamid ahaayeen Deborah  
Johnson iyo Abdimalik Askar, oo asagu ka  
socday Minnesota State Colleges iyo

Jaamacada Gobalkaasi.

Intii ay safarkaasi ku joogeen Puntland wafuudaasi ka socotay Jaamacadaha ayaa safaro ku maray gobalo kala gedisan waxayna wafuudaasi magaalada Laas Caano kula kulmeen Garaad Jaamac Garaad Cali asagoo markaa hadyad u siiyey macalimiinta ka socotay Jaamacadaha Maraykanka ee Professor Johnson iyo Jaamacada Inver Hills Community College fardo astaan u ah xiriirka ka dhaxeeya Jaamacadaha ku yaal gobalkaasi Minnisota iyo Gobalada Puntland.

Maamulka Jaamacada Inver Hills iyo Wasiirada ka socda Puntland ayaa ka wadhadlay sida lagu sii xoojin karo wadashaqeynta iyo Xiriirka ka dhaxeeya Jaamacadaasi iyo Puntland State.

Madaxa Jaamacada Inver Hills and Mrs. Frank ayaa ka hadashay kaalinta ay Ardayda kasoo jeeda dalka Soomaaliya ka geystaan Jaamacadaasi iyo waliba sida ay ugu hawlantahay in ay sare u qaado tirada ardayda Soomaalida ah Jaamacadaasi wax

ka dhigta

Abdimalik Askar

[aabdimalik@hotmail.com](mailto:aabdimalik@hotmail.com)

---

**Munaasabada Sanadguuradii 8aad ee Puntland oo lagu qabtay dalka Maraykanka**

---

<http://www.somalitalk.com/2006/aug/munaasabad.pdf>

Faafin: [www.SomaliTalk.com](http://www.SomaliTalk.com) | Agoosto 21, 2006